

Masuulka MENA



Waxaan tixgelinay xaaladaada MENA ahaan, yacni inaad tahay qof yar oo ajnabi ah oo aan lala socon.

? Waa maxay «MENA»?

Waxay ka dhigan tahay:

- Inaad ka **yar tahay 18 sano jir**
- Inaad haysan **dhalasho Beljim ah**
- Waalidiintaadu aan kula joogin Beljim
- **Aadan ha ysan ruqsad sax ah** oo aad ku joogtid Beljim

Beljamka, dhalinyerta ajnabiga ah ee aan lala socon waxay xaq u leeyihiin inay helaan **qof masuul ka noqda**.

1



i Laakiin ... muxuu sameeyaa qofka masuulka ah?

Qofk masuulka ah waa shakhsi aan ugu talagalnay inuu ku **taageero oo kaa caawiyo** nolol maalmeedkaaga Beljimka.

Isaga/Isagu waa wakiilkaaga sharciyeed: tani waxay ka dhigan tahay in iyadu/isagu kaa caawinayo dhammaan habraacyada aad u baahan tahay inaad raacdo si aad ugu noolaato dalka Belgium. Tusaale ahaan, haddii aad codsaneyso magangalyo ama aad codsaneyso inaad ku noolaato Beljim, iyadu/isagu wuxuu halkaas u joogaa inuu ku caawiyo inta ay hawsha socoto.

Qofka masuulka ah ayaa sameeya waxyaabo kale, sidoo kale. Halkaan waxaa ku qoran tusaalooyin yar:

- **Iyadu/isagu wuxuu ku soo booqanayaa inta badan;**
- Isaga/iyadu wuxuu **kuu sharxayaa go'aamada ay mas'uuliyiinta kaa gaareen adiga;**
- Iyada/Isagu wuxuu kuu raadinayaa **qareen bilaash ah;**

2

- Iyada/Isagu wuxuu hubiyaa inaad ku qanacsan tahay hoygaaga, haddii loo baahdana, wuxuu kaa caawinayaa inaad hesho **hoy kugu habboon;**
- Iyada/Isaga ayaa iskoolka kaa diiwaangelinaya wuxuuna xaqiijinayaa inay wax walba si wanaagsan **ugu socdaan dugsiga;**
- Haddii aad wax dhibaato caafimaad ah qabtid, iyadu/isagu wuxuu xaqiijinayaa inaad hesho **dhammaan daryeelka aad u baahan tahay;**
- Iyadu/isagu wuxuu maamulaa lacagtaada isagoo kula tashanaya;
- Markayarrimuhuaansihagaagsan usoonin, iyadu/isagu wuxuu dhageystaa dhibaatooyinkaaga;
- Iyadu/isagu wuxuu ixtiraamaa **aragtidaada iyo waxa aad aaminsantahay;**
- Iyadu/isagu wuxuu kaala hadlayaa mustaqbalkaaga;
- Haddii aad rabto, isagu/iyadu **wuxuu kaa caawin doonaa inaad raadsato waalidkaa;**

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid **waajibaadka mas'uulkaaga**, waad la hadli kartaa isaga/iyada.

3



Muddo intee le'eg ayaad haysan doontaa masuulka?

Masuulkaaga ayaa ku taageeri doona **illaa aad ka gareyso 18 sano**. Markaad gaarto 18, waxaad noqoneysaa qof madax bannaan.

Taasi micneheedu waa maxay?

Micnaheedu waa inaad adiga naftaada iska taxdiri doontid. Mas'uulka mar dambe awood uma yeelan doono inuu go'aan kuu gaaro adiga.

Laakiin ha walwelin, **masuulkaaga ayaa kaa caawin doona inaad u diyaar garowdo sanadkaaga 18-aad:** iyada/isaga wuxuu ku siin doonaa talo wuxuuna kuu sharxi doonaa waxaad u baahan tahay inaad ogaato.

Si kastaba ha noqotee, waxaa suurtagal ah in shaqada mas'uulkaaga ay joogsato ka hor intaadan 18 gaarin: haddii waalidiintaadu ay yimaadaan Belgium, ama haddii aad ka tagto Belgium. Xaaladaha noocaas oo kale ah, waxaan kuu soo diri doonaa warqad aan ku sheegayno inaad haysan qof masuul kaa ah. Mas'uulka ayaa kaala hadli doona arrintan.



Maxaa dhacaya haddii aad dhibaato ku qabtid mas'uulkaaga?

Masuulka waa inuu ku dhageystaa oo uu diyaar kuu ahaadaa. Isku day inaad kala hadashid asaga/ayada waxa qaldan.

Maxaa dhacaya haddii aysan midaas shaqeyn?

- **Nala soo xiriir;** waxaan isku dayi karnaa inaan xallino dhibaataada.
- Waxaad sidoo kale aadi kartaa Qeybta **Caddaaladda Nabadda**. Iyada/Isaga wuxuu halkaas u joogaa inuu xalliyo masalooyinka adiga iyo masuulkaaga idinka dhexeeya. Waxaad na weydiin kartaa macluumaad dheeri ah ama waxaad weydiin kartaa shaqaalaha bulshada ee jooga xerada soo-dhowaynta.



Sidee noola soo xiriiri kartaa?

Waxaad **24/7** nagala soo xiriiri kartaa lambarka taleefankan:

☎ **078/15.43.24**

Waxaad sidoo kale **iimayl** u diri kartaa:

✉ **tutelles@just.gov.be**

Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad noola soo xiriirto, waxaad weydiin kartaa **shaqaalahaaga bulshada** ee jooga xerada soo dhowaynta **ama qareenkaaga**.

